



MINNESOTA
JUDICIAL
BRANCH

Olmsted County District Court/ Maxkamadda Degmada Deegaanka Olmsted
Jury Summons Processing Center
410 South 5th Street, Suite 204
Hallock, MN 56728-4141

(507) 722-7327
(507) 285-8996 (Fax/Fakiska)

**COMPLETE and SUBMIT your Qualification Questionnaire ONLINE at:
KU SOO BUUXI INTARNETKA oo SOO DIR Su'aalaha Qoran ee aad arki
doonto: <https://www.mncourts.gov/jury>**

RESPOND TO YOUR SUMMONS WITHIN 10 DAYS

10 MAALMOOD GUDAHOOD UGA SOO JAWAAB U-YEERISTAADA

*If Internet is not available, submit the paper qualification questionnaire below by mail.
Haddii aadan internet heli karin, su'aalaha lagaa rabo ee aad ka soo jawabto noogu soo
dir cinwaanka hoose.*

SUMMONS

U-YEERIS MAXKAMAD

You are hereby notified that you have been selected to serve as a trial juror in the County District Court.
Waxaa lagugu wargelinayaa in lagu doortay in aad xeerbeegti maxkamadeed ka noqoto Maxkamadda Degmada ee Deegaanka.

Juror Number/Lambarka Xeerbeegtida:

- Please read both sides of the summons and complete the questionnaire either online or on paper, but not both.
Fadlan akhriso labada dhinac ee waraaqdan oo ah u-yeeris oo barta intarnetka ama waraaqdan uga soo jawaab su'aalo ku qoran, laakiin hal meel keliya uga soo jawaab.
- Information about jury service and court safety can be found at mncourts.gov/jury or on the **My Minnesota Juror** mobile app.
Macluumaadka ku saabsan adeegga xeerbeegtida iyo ammaanka maxkamadda waxaa laga heli karaa mncourts.gov/jury ama **My Minnesota Juror** oo ah abka maxkamadda.
- If questions remain, please contact us.
Haddii su'aalo weli noo qabto, fadlan nala soo xiriir.

OLMSTED COUNTY JURY SUMMONS
U-YEERISTA XEERBEEGTIDA DEEGAANKA OLMSTED

LENGTH OF SERVICE: Your term of service will be for a **two-week period** (excluding weekends) beginning on the date shown above. If you are chosen as a juror on a trial that does not end during your term, your service will extend to the end of the trial.

MUDDADA HAWSHA XEERBEEGTIDA: Muddada hawshaada waa **muddo ah laba bilood** (marka laga saaro sabtiyada iyo axadaha) oo ka bilaaban doonta taariikhda kor ku qoran. Haddii lagu doorto xeerbeegtida dacwad ah maxkamadeyn oo ay kuugu soo idlaan weydo muddada lagu qabtay, hawsha waa in aad sii waddo ilaa ay maxkamadeyntu soo idlaato.

WHEN TO REPORT: Call the jury information line at **(507) 722-7328** after **4:30 p.m. the Friday before your term begins and after 4:30 p.m. each day thereafter until your service is over to know whether you need to report.** The reporting location will always be at the Government Center, 151 SE 4th Street, Rochester, Minnesota. Do not report unless instructed to do so in the recording.

GOORTAAD IMAANEYSO: Soo garaac taleefanka macluumaadka xeerbeegtida ee **(507) 722-7328** wixii ka dambeeya **4:30 galabnimo Jimcaha ka hor inta uusan wakhtigaagu kuu bilaaban iyo ka dib 4:30 galabnimo maalin kasta oo ka dambeysa ilaa aad qabato hawsha lagaa rabo oo aad ogaato in lagu sii baahan yahay iyo in kale.** Goobtaad imaaneyso had iyo jeer waa Xarunta Dowladda, 151 SE 4th Street, Rochester, Minnesota. Ha imaan xarundin ilaa farriin cod ah oo duuban laguugu soo sheego inaad timaaddo.

THIS IS THE ONLY WRITTEN NOTICE YOU WILL RECEIVE FOR YOUR JURY SERVICE.

WAA OGEYSIISKA KELIYA EE HAWSHAADA XEERBEEGTIDA EE AAD KU HELI DOONTO QORAAL AHAAN.

JUROR INFORMATION: See reverse side for important information about requesting a postponement.

MACLUUMAADKA XEERBEEGTIDA: Dhinaca kale ka eego macluumaad muhiim ah oo ku saabsan codsiga dibu-dhigista.

Use THIS paper as your JUROR PARKING PERMIT and place on the dashboard of your vehicle.

WARAAQDAN waa OGGOLAANSHAHA BAARKINKA XEERBEEGTIDA oo waa in ay ka muuqato gudaha muraayadda hore ee baabuurka.

This permit is only valid when reporting for jury duty.

Oggolaanshahan waa keliya marka loo imaanayo hawsha xeerbeegtida.

Juror parking is available in the numbered spots in the GOVERNMENT CENTER – BROWN LOT, which is located directly across the street from the Government Center on the south side of 4th Street SE (in front of the Government Center Annex/Work Release Facility).

Baarkinka xeerbeegtida waa kuwa ku leh lambarro barxadda GOVERNMENT CENTER – BROWN LOT (XARUNTA DAWLADDA – BAARKINKA BAROWNKA), oo waa ka soo hor jeedka jidka xarunta dowladda ee dhanka koonfureed 4th Street SE (ka soo horjeedka Xarunta Dawladda ee Ku-dheggan/Xarunta Shaqaaleynta Maxbuuska).

Using this parking permit, you will not need to pay for parking in this lot. OVERFLOW PARKING is also available in the lot East of the Government Center South Lot, which has an address of 210 4th Street SE, entering on 4th Street near the Rochester Community Warming Center.

Markaad isticmaaleyso oggolaanshaha baarkinka, uma baahnid in aad wax lacag ah bixiso. BAARKIN DHEERAAD AH waxaa laga heli karaa dhankaa Bariga ee Xarunta Dowladda ee South Lot, oo ciwaankuna waa 210 4th Street SE, marka laga soo galayo 4th Street oo u dhow Rochester Community Warming Center (Xarunta Is-kululeynta ee Dadweynaha Rochester).

If you have questions about your qualifications or need to submit supplemental documentation with your questionnaire, please email: MJBjury@courts.state.mn.us or call 888-902-9581. Please include your juror number so we can better assist you. For location specific questions, such as reporting instructions or directions, please contact your Court Administration at: (507) 722-7327.

Haddii aad su'aalo ka qabto in aad ka bixi karto hawsha lagaa rabo, waa inaad noo soo gudbiso jawaabahaaga su'aalaha qoran, fadlan noogu soo dir: MJBjury@courts.state.mn.us ama soo garaac 888-902-9581. Fadlan ku soo qor lambarkaaga xeerbeegtida si aan si fiican kuugu caawin karno. Su'aalaha gaarka ah ee goobta aad imaaneyso, sida aad isu xaadirineyso ama sida aad ku imaaneyso, fadlan kala soo xiriir Maamulka Maxkamadda Deegaankaaga: (507) 722-7327.

District: 3 County: 55/ Degmada: 3 Deegaanka: 55
Olmsted County District Court/ Maxkamadda Degmada Deegaanka Olmsted
Jury Summons Processing Center
410 South 5th Street, Suite 204
Hallock, MN 56728-4141

**Complete Questionnaire on-line or by paper. Submit within 10 days.
Su'aalaha Qoran uga jawaab intarnetka ama waraaqda. Ku soo dir
10 maalmood gudahood.**

Minnesota law requires you to serve on jury service if qualified. You may be guilty of a crime if you do one of the following (Minnesota Statutes Chapter 593).

Sharciga Minnesota ayaad shuruud ka dhigaya in aad qeyb ka noqoto xeerbeegtida haddii aad hawsha qaban karto. Waxa laga yaabaa in aad danbi kugu noqoto haddii aad sameyso mid ka mid waxyaabaha soo socda (Sharci-hoosaadka Minnesota Cutubka 593).

- Fail to return this questionnaire
Haddii aad soo diri weydo su'aalaha oo aad ka soo jawaabtay
- Misrepresent information on this jury questionnaire
Haddii aad ka beensheegto jawaabahaaga su'aalaha xeerbeegtida
- Fail to show up for jury service as directed
Haddii aad u imaan weydo hawsha laguugu yeeray ee ah xeerbeegti

**SECTION A — QUALIFICATION QUESTIONS
QAYBTA A - SU'AALAHADA AQAANTAADA**

This questionnaire is necessary to determine whether you are qualified to serve as a juror.

Su'aalaha qoran waxay lagama maarmaan u yihiin in lagu go'aamiyo haddii aad u qalanto in aad qabato hawsha xeerbeegtida.

Please check the appropriate boxes.

Fadlan ku calaamadi jawaabahaaga santuuqyada hoose.

- YES NO 1. Are you a citizen of the United States? If NO, List country of citizenship _____.
HAA MAYA Ma haysataa dhalashada Mareykanka? Haddii aad MAYA tiri, qor dalka aad dhalashada ka haysato _____.
- YES NO 2. Are you at least 18 years old? If NO, enter date of birth _____ (mm/dd/yyyy).
HAA MAYA Ma tahay ugu yaraan 18 jir? Haddii aad MAYA tiri, qor taariikhdaada dhalashada _____ (mm/dd/yyyy).
- YES NO 3. Are you a resident of this County? If NO, List county of residence _____.
HAA MAYA Ma haysataa sharciga deggenaanshaha ee dalkan? Haddii aad MAYA tiri, Qor dalka aad deggan tahay _____.
- YES NO 4. Are you able to speak and understand English **and** are others able to understand you?
HAA MAYA Ma ku hadli kartaa oo ma fahmi kartaa afka Ingiriisiga **oo** miyey dadka kale fahmi karaan Ingiriiska aad kula hadasho?
- YES NO 5. Do you have a physical or mental disability that would affect your ability to serve on a jury? If YES, you must include a
HAA MAYA written explanation of the disability, as well as a description of any requested accommodations that would allow you to serve.
A medical statement may be required.
Miyey jirtaa naafanimo aad qabto oo ah jirka ama maskaxda oo saameyn ku yeelan karta sida aad u qabaneyso hawsha xeerbeegtida? Haddii aa HAA tiri, waa inaad si qoraal ah ku soo sharraxdo naafanimada, iyo faahfaahinta wixii qaabilaad oo aad u codsaneyso si aad hawsha qeyb uga noqoto. Warbixin caafimaad ayaa laga yaabaa in lagaaga baahdo.
Are you requesting an accommodation, which would allow you to serve on a jury? YES NO
Ma codsaneyso qaabilaad gaar ah, si aad qeyb uga noqoto hawsha xeerbeegtida? HAA MAYA
Space is provided on the back of this form to describe your disability and the accommodation(s) needed which would allow you to perform jury service.
Meel ayaa ka bannaan dhinaca gadaale ee foomkan si aad ugu soo faahfaahiso naafanimadaada iyo haddii aad u baahan tahay qaabilaad (gaar ah) si aad hawsha xeerbeegtida qeyb uga noqoto.
- YES NO 6. Have you ever been convicted of a felony? If YES, are you still on parole or still under the supervision of the Court,
HAA MAYA Probation or Corrections? YES NO
Weligaa ma lagugu xukumay dambi culus? Haddii HAA tiri, ma ku jirtaa siideyn xabsi oo shuruudeysan ama miyey jirtaa in ay kaa war hayaan Maxkamad, Barobeyshan ama Waaxda Asluubta? HAA MAYA
- YES NO 7. Have you ever been on jury duty any where in Minnesota in the past four years? Please note that jury duty is not limited
HAA MAYA to actual service on a case. It is defined as a person who filled out the questionnaire, is qualified as a juror, and goes or is available to go to the courthouse to serve as a juror. IF YES, when and where?
Afartii sano ee la soo dhaafay weligaa ma ka qeybqaadatay hawl xeerbeegti Minnesota oo waa halkee? Fadlan ogow in aysan waajibaadka xeerbeegtida ku koobneyn adeeg kiis dhab ah oo keliya. Qeexid ahaan waa qof kasta oo ka soo jawaaba su'aalaha, oo u qalmi kara xeerbeegti, oo taga ama diyaar u ah in uu yimaado maxkamad si uu xeerbeegtida qeyb uga noqdo. Haddii HAA tiri, goorma iyo meelma? _____
- YES NO 8. Are you a judge in the judicial branch?
HAA MAYA Ma tahay garsoore u shaqeeya waaxda garsoorka?

FOR PERSONS AGE 70 OR OVER ONLY: If you are 70 years of age or older, you may serve on jury duty OR you may be excused. Do you wish to be excused? YES NO If YES, enter date of birth _____ (mm/dd/yyyy)

DADKA DA'DOODU TAHAY AMA KA WEYN 70 JIR OO KELIYA: haddii aad tahay ama ka weyn tahay 70 jir, waxaad noqon kartaa xeerbeegti AMA waa lagu fasixi karaa. Ma rabtaa in hawshan lagaa daayo? HAA MAYA Haddii aad HAA tiri, qor taariikhdaada dhalashada _____ (xx/xx/xxxx)

**QUESTIONNAIRE CONTINUES ON REVERSE SIDE — PLEASE COMPLETE BOTH SIDES OF THIS FORM
SU'AALUHU WAXAY SOCDAN — FADLAN EEG BOGGA KALE OO SOO BUUXI LABADA DHINAC EE
FOOMKA**

SIDA LAGUU SOO XUSHAY: Magacaaga ayaa si bakhtiyaa-nasiib ah looga dhex doortay liiska dadka haysta leysanka wadista baabuurta, dadka haysta kaarka aqoonsiga gobolka iyo dadka codbixiyeyaasha ah ee diwaanka gashan. Waa in aad isku tixgeliso in aad qaban karto waajibaadka xeerbeegtida oo waa in aad timaaddo maxkamadda sida laguugu soo sharxay dhinaca hore ee waraaqda u-yeerista, haddii aysan maxkamaddu qoraal ahaan kugu soo wargelin in lagu fasaxay.

CUDURDAAR IYO DIBU-DIGASHO: Waa in aad ka soo jawaabto oo aad soo dirto su'aalaha qoraalka ah ee xeerbeegtida. Haddii aad mar hore sameysay dibu-dhigashada hawshan, waxaa lagaa rabaa in aad hubiso, ku qorto wixii cusub oo aad MAR KALE SOO DIRTO jawaabahaaga. Goob kasta oo la shaqeeyo sharcigu ayaa shuruud uga dhigaya in ay shaqaalaha soo siiyaan fasax si ay u noqdaan xeerbeegti, oo muwaadiniinta qaban kara hawshan waxaa khasab ku ah in ay ka qeybgalaan. Haddii aad ku khasban tahay dhib jira awgiis in aad codsato dibu-dhigis, waxaad sidaas ku qori kartaa qeybta hoose oo ah codsiga dibu-dhigista. Sida aad hawshan uga soo bixi karto iyo codsi kasta oo kuu noqonaya cudurdaar ama dibu-dhigis in lagaa yeelo dibu-eegista waxaa soo go'aamin doona maxkamadda. Qoraal ahaan ayaa laguugu soo ogeysiin doonaa haddii aan LAGAAGA baahneyn in aad timaaddo ama haddii lagu beddelo taariikhda aad imaaneyso.

MUSHAARKA XEERBEEGTIDA: Waxaad laguugu siin doonaa lacag yar maalin kasta oo aad timaaddo maxkamadda. Waxa kale oo laguugu soo celin doonaa lacagta masaafada safarka maxkamadda ee ah sii-socod iyo soo-socod. Haddii laguugu eego shuruudo gaar ah, waxa laga yaabaa in aad xaq u yeelato in laguugu celiyo kharashaadka xannaanada carruurta. Macluumaadka iyo foomamka ku saabsan in laguugu celiyo kharashaadka xannaanada carruurta waxaad heli doontaa markaad u timaaddo hawsha xeerbeegtida.

TAKOORID: Ma dhici karto in muwaadin looga saaro hawsha xeerbeegtida gobolkan iyadoo loo eegayo isir, midab, caqiido, diin, lab iyo dheddig, asalkii hore, xaalad xaas ahaaneed, xaalad la xiriirta kaalmo dowladeed, naafanimi, da', mihnad shaqo, naafanimi jir ahaaneed ama mid dareen ahaaneed, dookha galmada, ama heerka dhaqaale.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH: Waxaa laguugu sheegi doonaa macluumaad ku saabsan masuuliyadda xeerbeegtida maalinta ugu horreysa ee aad timaaddo. Hubku mamnuuc ayuu ka yahay dhismaha oo waxaa laga yaabaa in lagu baaro. Taleefanka gacanta iyo aaladaha la midka ah mamnuuc ayey ka yihiin qolalka maxkamadda. U soo diyaargarow in aad maalinta inteeda badan dhex joogi doontid maxkamadda. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adeegga xeerbeegtida ka eego: <http://mncourts.gov/Jurors.aspx>. **Haddii wax qaabilaad ah loo baahdo si aad u qabato waajibaadka xeerbeegtida, fadlan la xiriir Maareeyaha xeerbeegtida KA HOR taariikhdaad imaaneyso.**

HADDII AAD RABTO IN AY MAXKAMADDU FARRIIMO KUUGU SOO DIRTO BOOSTADAADA

INTARNETKA: Maxkamaddu waxay farriimaha qaarkood kuugu soo diri kartaa boostadaada intarnetka. Haddii aad qeybta hoose ee bannaan ee la jeexayo noogu soo qorto cinwaankaaga boostada intarnetka, waxaad oggolaatay waa in farriimo ah boostada intarnetka lagaaga soo diro xafiiska xeerbeegtida. Haddii aad taleefankaaga ka eegato boostadaada intarnetka, farriimaha qoraalka ah iyo isticmaalidda ayaa kharash kugu noqon kara. Haddii aadan rabin in aad farriimo ah boostada intarnetka ka hesho xafiiska xeerbeegtida, ha ku qorin ciwaankaaga boostada intarnetka meesha bannaan ee qeybta hoose. Waxa la sii wadi doonaa in cinwaankaaga guriga waraaqo laguugu soo diro.

Maxkamadeynta xeerbeegtida waa xuquuq ay leeyihiin dadka Mareykanka ah oo aasaasi ah, oo ku cad State and Federal Constitutions (Dastuurka Gobolka iyo kan Federaalka labadaba). Adigoo ka mid ah xeerbeegtida mustaqbalka, waxaad haysataa fursad aad si toos ah uga qeybgaleyso qeyb muhiim ah oo ka mid ah dimuquraadiyadeena. Waad ku mahadsan tahay wakhtigaaga iyo in aad noo soo direyso jawaabaha lagaa rabo ee su'aalaha iyo in aad diyaar u tahay hawsha xeerbeegtida.

SECTION B - STATISTICAL INFORMATION
QEYBTA B - MACLUUMAADKA TIRAKOOBKA

This information is requested pursuant to Court rule and has no bearing on qualification for jury service.
Macluumaadkan waxaa lagu codsanayaa iyadoo la raacayo Sharci Maxkamadeed oo raad kuma laha sida looga qeyb qaadan karo hawsha xeerbeegtida.

DATE OF BIRTH TAARIKHDAADA DHALASHADA / / Mo Day Yr Bishii maalintii Sannadkii		RACE (Mark an X in one or more boxes to indicate what race you consider yourself.) ISIRKA (Calaamadi mid ama in ka badan santuuqyada hoose oo aad ku sheegeyso isirka aad ka soo jeeddo.) <input type="checkbox"/> American Indian or Alaska Native Hindida Mareykanka ama Dhaladka Alaska <input type="checkbox"/> Black or African American Madow ama Afrikaanka Mareykanka <input type="checkbox"/> White Caddaan <input type="checkbox"/> Asian Aasiyaan <input type="checkbox"/> Native Hawaiian or Other Pacific Islander Dhaladka Haawaay ama Jasiiradaha Kale ee Baasifigga <input type="checkbox"/> Some Other Race Isirka Kale		AND / IYO Are you of Spanish/Hispanic/Latino Origin or Descent? Ma waxaad tahay Isbaanish/Xisbaanig/Asalkii Hore Laatiino? <input type="checkbox"/> Yes HAA <input type="checkbox"/> No MAYA	GENDER JINSI <input type="checkbox"/> Male Lab <input type="checkbox"/> Female Dheddig
YOUR OCCUPATION/MIHNADDAADA SHAQADA		EDUCATION/WAXBARASHO <input type="checkbox"/> Less Than H.S. Diploma Wax Ka Hooseeya Dugsi Sare Shahaado <input type="checkbox"/> H.S. Diploma or GED Dugsi Sare ama GED <input type="checkbox"/> Some College, Vocational or Other Additional Education Xoogaa Kulleej ah, Farsamo ama Waxbarasho Kale <input type="checkbox"/> Bachelor's, Vocational or Equivalent Degree Jaamacad Afar Sano, Farsamo ama Wax la Mid ah <input type="checkbox"/> Master's Advanced or Equivalent Degree Jaamacad Heerka Labaad ama Wax la Mid ah			
MARITAL STATUS XAALADDA XAAS AHAANEED <input type="checkbox"/> Married Xaas <input type="checkbox"/> Unmarried Iskaabulo		SPOUSE'S OCCUPATION SHAQADA LAMMAANHAAGA		AGE (S) OF CHILDREN/DA'DA CARRUURTA 1.) _____ 2.) _____ 3.) _____ 4.) _____ 5.) _____	

PLEASE PROVIDE PHONE NUMBER(S) WHERE YOU MAY BE CONTACTED
FADLAN QOR TALEEFANNADA LAGAALA SOO XIRIIRI KARO

HOME PHONE/TALEEFANKA GURIGA () ()	WORK PHONE/TALEEFANKA SHAQADA () ()	CELL PHONE/TALEEFANKA GACANTA () ()
--	---	---

Question 5. DISABILITY AND ACCOMMODATION REQUESTS
Su'aasha 5aad. CODSIYADA NAAFADA IYO QAABILAADDA

Describe your physical or mental disability:/Faahfaahi naafanimadaada ah jirka ama maskaxda: _____

Describe the accommodations you are requesting which would allow you to perform jury service:/Faahfaahi qaabilaadda aad codsaneyso si aad qeyb uga noqoto hawsha xeerbeegtida: _____

PLEASE PRINT ANY CHANGE IN NAME OR MAILING ADDRESS
FADLAN FAR WAAWEYN KU QOR HADDII AY WAX ISKA BEDDELEEN MAGACAAGA AMA CINWAANKAAGA

LAST NAME/MAGACA AWOOWAHAA	FIRST/MAGACAAGA	MIDDLE/MAGACA AABBAHAA	
ADDRESS/CINWAANKAAGA	CITY/MAGAALADA	STATE/GOBOLKA	ZIP/LAMBARKA BOOSTADA XAAFADDA (ZIP)

ADD YOUR EMAIL ADDRESS HERE TO OPT IN TO RECEIVE EMAIL COMMUNICATIONS FROM THE COURT
QOR CINWAANKAAGA BOOSTADA INTARNETKA SI AAD WIXII FARRIIMO AH UGA HESHO MAXKAMADDA

EMAIL/BOOSTADAADA INTARNETKA

POSTPONEMENTS
DIBU-DHIGID

I AM REQUESTING A POSTPONEMENT FOR THE FOLLOWING REASON: _____

WAXAAN CODSANAYAA IN DIB LA IIGU DHIGO SABABTA HOOS KU QORAN AWGEED: _____

Alternative time frame within 9 months of original service date that I could serve: 1st Choice Starting: _____ 2nd Choice Starting: _____

Wakhtigaad rabto ilaa 9 bilood gudahood markaad ka soo bilowdo taariikhdi hore ee hawsha lagaa rabay: Bilowga Marka 1aad: _____

Bilowga Marka 2aad: _____

WITHIN 10 DAYS, COMPLETE ON-LINE OR SIGN AND MAIL THIS COMPLETED QUESTIONNAIRE.
10 MAALMOOD GUDAHOOD, KU SOO BUUXI INTARNETKA AMA SAXIIX WARAAQDAN OO KU SOO DIR BOOSTADA KA DIB MARKAAD KA JAWAABTO SU'AASHAN OO DHAN.

If another person assisted you in completing this form, please explain why and indicate the name of the person here.
Haddii uu qof kale kugu caawiyey buuxinta foomkan, fadlan halkan ku qor sababta qofku kuu caawiyey iyo magaca qofka.

I declare under penalty of perjury that everything I have stated in this document is true and correct.
Waxaan sharciga ciqaabta dhaarta beenta ah ku caddeynayaa wax kasta oo aan ku sheegay waraaqdan in ay yihiin run iyo sax.

Signature/Saxiix

Print Name/Far Waaweyn Magacaaga

Date/Taariikhda